



Sebteembar 2023 Somali | Soomaali

## Waxaan u soconaa in aan hawlgab ka dhigno guryaheena dhaadheer.

Waxaanu ka caawin doonaa kiraystayaasha talaabo kasta oo horay loo qaadayo.

Dhamaan reer Fiktooriya waxay istaahilaan ammaan, iyo guryo la awoodi karo. Waa waqtigii talaabada ku xigta horay loo qaadi lahaa iyada oo la bixinayo gurya casri ah, ku haboon, beekhaaminaya tamarta, iyo gurya sahal lagu geli karo kuwaas oo ku haboon ujeedo xoojin karta bulshooyinkeena soo kobcaya.

### Tani adiga maxay kuu tahay?

Wax degdeg isku bedelayaa ma jiraan. Uma baahnid inaad degdeg guriga ugu guуро.

Ka gudbida guryaheena gaboobey oo dhaadheer waxay ku qaadanaysaa waqtii Homes Victoria waxayna xaqijinaysaa inaad hesho meel loogu yeero hoy marka hawshani horay u socoto.

Waxaan halkaan u joognaa in aan kula shaqayno si aad u hesho aragti aadna u fahamto baahiyaha dejintaada.

Ka gudbida guryaha dhaadheer ee dadweynuhu waxay wanaajin doontaa tayada, qanaacada iyo hoy-ka-dhigashada guryaha deganayaasheena u baahan gurisiinta.

### Ka gaboobida guryaheena dhaadheer

Guryaheena da'da ah ee dadweynaha waxaa ka soo dhamaanaysaa nolol hawleedkooda, mana muuqato in lagu sii wado dayactirka sarahaan mustawayasha heer casriga ah kuwaas oo buuxinaya baahiyaha bulshadeena iyo filashada.

Laga bilaabo maanta, waxaanu bilaabayna kala shaqaynta shaqa-ka-fariisadka guryaha dhaadheer ee dadweynaha.

Sanadaha soo socda, Homes Victoria shaqada waa ka fariisanaysaa waxayna u bedelaysaa 44ta guri ee dhaadheer ee ku yaalla Melbourne inay bixiyaan gurya la helli karo oo casri ah, lehna tas-hiilaad bulsho si ay u canqariyaan bulshadeena.

Dhamaan deganayaasha waxaa la siin doonaa macluumaad wax ku oolla iyo taageero (ay ku jiraan macluumaad afkaaga ku qoran) bilaha soo socda wixii ku saabsan talaabooyinka ku xiga markaan aan ka gudbayno guryaha dhaadheer iyo dhisida gurya ka wanaagsan.

## Dhegaysiga dadweynaha

Waxaan halka u joognaa in aan ku dhegaysano. Iyada oo hawshu ku wajahan tahay ka guurida guryaheenii dhaadheeraa, waxaan doonaynaa in aan fahamno kana jawaabno su'aallahaaga.

Bilaha soo socda, waanu kula hadli doonaa adiga si aad u fahamto:

- Wixii muhiim kuu ah adiga iyo bulshadaada
- Sidaad rabto inaad ku hesho macluumaadka iyo
- Iyo doorbididaada gurisiniinta iyo baahiyahaaga.

Maalmaha soo socda shakhsyan ayaad noo heli kartaa si looga jawaabo su'aallahaaga laguuna siiyo talo iyo kaalmo.

## Kaalmayntaada heer kasta

Adiga iyo bulshadaada ayaa ah xudunta barnaamijkaan – waxaanu kaa caawimi doonaa wax kasta oo aad la kulanto.

Si dhow ayaan kuula shaqaynaynaa adiga iyo bulshadaada si loo xaqijiyo inaad hesho macluumaadka aad u baahan tahay, markaad u baahan tahay.

Marka qorshaha looga takhalusayo guryaha dhaadheer u qaadan muddo, waxaanu ku siinaynaa koox diyaara oo khibrad leh, si ay kaala shaqeeyaan talaabooyinkaan la marayo.

## Macluumaad intaas ka badan

Wac **1800 716 866** halkaas oo mutarjuumiin laga heli karo ama **email ugu dir** [enquiries@homes.vic.gov.au](mailto:enquiries@homes.vic.gov.au)

**Imaw** macluumaad siinta bulshada balan la'aan. Waqtiyada iyo taariikhaha waxaa lagu soo qori doonaa websaytkayaga, guryaha iridooda.

Booqo [homes.vic.gov.au](http://homes.vic.gov.au)



**Wax badan ka ogow oo gal dhamaan macluumaadka la tarjumay**  
adiga oo ka helaya QR code-kaan.

[homes.vic.gov.au](http://homes.vic.gov.au)